

GUURSASHO AADAN ADIGA RABIN? IN LAGAAGA SOO TAGO DIBADDA? AAD KA BAQEYSO INEY TAASI DHICI DOONTO?

Landelijk Knooppunt
**HUWELIJKSDWANG EN ACHTERLATING**

## Adiga ayaa noloshaada ka go’aaminaaya

Ma ka baqeysaa *guursasho qasab* ama *lagaaga soo tago dibadda*? Hoos ka aqriso waxa aad sameyn karto si aad taasi uga hortagto. Iyo waxa aad sameyn karto haddii ay taasi dhacday.

### Muxuu yahay guurka qasabka ah?

Guurka waa tallaabo weyn oo noloshaada ah. Qofka aad guursaneyso waa inaad adiga go’aansataa. Dhalinyarada qaarkood dhalinyar wiilal iyo dhalinyar gabdho ahba xor uma aha iney lamaanahooda doortaan. Waalidka iyo/ama reerka ayaa u raadinaaya qof markaasoo lagu qasbaayo iney qofkaasi guursadaan. Mar mar waa hadal ahaan, mar marna handadaad, ceebeyn ama garaacid loo geysto. Tani waa guur qasab ah waana dembi sharciga ciqaab ka mudan.



### Muxuu yahay ka soo tegida?

Ka soo qaad, waxaad aaday fasax dibadda ama familka oo aad soo booqaneysid dibadda markaasina mar keliya laguu diido inaad Nederlnad u noqoto. Ama Nederland ayaa diyaarad lagaa saaraayaa. Dhamaan xariirka aad la leedahay Nederland waa inaad goysaa ama joojisaa. Waalidkaaga, familkaaga ama ninkaaga ayaa u arka iney kuu fiican tahay inaad dibadda joogtaa, iyadoo ay ku ilaalinaayaan reerka ama iskuul waxbarasho xajisan leh. Baasaboorka, sharcigaaga, telefoonka iyo kaarka bankiga waa lagaa qaadayaa. Si aad ah ayaa laguu cadaadinaayaa si aad u ogolaato. Tani waa ka soo tegitaan. Taasi waa dagaal qoyska ah.

## Foojignoow. Calaamadaha dhaqso u aqoonso

Badiyaa waxaa jiro calaamado in mashruuc la sameynaayo oo guur qasab ah ama in dibadda lagaaga soo tago. Waalidkaaga, ninkaaga ama reerka ayaa mar keliya noqonaaya kuwa wax cadaadiya. Waxyaalaha qaarkood ayaa sameyntooda laguu diidayaa (banaanka inaad aado, inaad soo baashaasho, inaa shaqeyso, asxaabta aad la xariirto) waxyaalo kalena waa inaad sameysaa (guriga joogtaa. dhar ’xishmad’ leh inaad xirato ama aad xijaabka qaadataa).

Mar mar waxaa jira wel wel ama dhibaato reerka ka dhex taagan. Mar mar si lama filaan ayaa laguu wadaayaa fasax ama soo booqasho dibadda ah. Ama waxaa lagugu handadaayaa in dibadda lagaaga soo tagaayo ama guur qasab ah. Calaamadahan u qaado si dhab ah. Haddii aad shakiso iney wax jiraan, markaa caawino raadso.



## Maxaad sameyn kartaa hadda (weli) Nederland joogto?

**Amaanka** » Haddii aad tallaabo qaado iyo aad la xariirto kuwa dadka caawiya, taasi waxaad sameysaa waqti aad hubto inaan qof kale ku maqleynin. Ha sameynin qatar aan loo baahnayn.

**Ka hadal arrinta** » Kala hadal saaxiibtaada ama asxaabtaada ama qof agagaarkaaga oo aad ku kalsoon tahay iyo u sheeg waxa aad ka cabsaneyso.

**Digtoonow: marka qatar ama amaan daro jiro wac mar kasta 112!**

Taasi dhaqtarka qoyskana waa noqon karaan, macalinka xitaa tababaraha ama shaqaalaha xaafada. Sidoo kale mar walba si dahsoon ayaad ula xariiri kartaa caawiyayaasha Veilig Thuis (0800-2000) ama waxaa kala xariirtaa chat-ka www.veiligthuis.nl. Waxaa kaloo si kalsooni ah ugala xariiri kartaa chat-ka shaqaalaha Fier kala xariir Fier at chatmet.fier.nl Ama si kalsooni aad chat-ka kala xriiri kartaa www.sterkhuis.nl/contact.

**Sii joog Nederland** » Isku day inaad Nederland joogto. Ma u maleyneysaa inaad qatar ku sugan tahay? Markaa raadso caawino intaadan Nederland ka bixin.

**Suura geli inaad soo noqoto** » Ma yahay safarka dibadda mid aan laga hortegi karin? Markaa wiigaga bixitaanka ka hor sii qaad tallaabooyin suura gelinaaya inaad Nederland ku soo noqoto.

- Telefoonkaaga gacanta waxaad gelisaa nambarada taleefoonka ee ururada wax caawiya iyo nambarka qofka aad ku kalsoon tahay. Nambaradaasi ku keydi cloud-ka ama meel ku qor, si haddii taleefoonka lagaa qaato aad weli haysato. Waxaa kaloo e-mail ahaan ugu diri kartaa e-mail qarsoodi kuu ah.
- Ama boorsada ku qaado taleefoon labaad ama kaar prepaid-ka oo wax fiican ku jiro kuna filan inaad Nederland kula hadli karto. Tani meel fiican ku qari.
- Waxaad soo dejisaa *ReisApp-ka* wasaaradda Arrimaha Dibadda oo ay ku qoran yihiin warbixinta loola xariiro safaaraddaha Nederlaanka.
- Ka samey koobi ama sawir baasaboorkaaga iyo sharcigaaga deganaansho oo e-mail ahaan adiga isku soo dir. Sidoo kale sii qaado iyadoo warqad koobi ah. Haddii baasaboorka lagaa qaato markaa weli warbixinta waad heysataa. Markaa safaaradda si dhaqso ah ayey dokumenti safar u sameyn karaan.
- Waxaad kaloo e-mail ahaan isugu dirtaa: cinwaa-nada, warbixinta safarkaaga diyaaradda, sawir mar dhow ah iyo Nambarka Adeega Muwaadinka (BSN).
- Qaado lacag oo meel fiican ku qarso.

Kala hadal qof aad ku kalsoon tahay safarkaaga. U sheeg wel welkaaga oo sii dhamaan warbixinta safarkaaga, meesha aad joogeysid iyo safarka noqoshada warbixintiisa. Markaana asaga/iyada ay kantarooli karaa haddii aad Nederland ku soo noqotay. Sidoo kale kula ballan waxa la sameynaayo haddii aadan soo noqonin. Sida in lala xariiro Xariirinta wadanka ee Guurka qasabka iyo ka soo tegida (LKHA).

LKHA waa ururka dhexe ee Nederland oo caawino bixiya haddii dibadda lagugu qasbo inaad guursato ama dibada lagaaga tegay. Dadka caawiyayaasha waa qabiiro qibrado dheeraad ah leh.



**Ma taqaanaa dhibanayaal?** » Ma taqaanaa qof cidaada, saaxiibtaada ama qof aad taqaano oo ah dhibane/ ama noqoneyso mid guur lagu qasbaayo ama dibada looga soo tegaayo? Markaa la xariir LKHA si ay u caawiyaan.

# Maxaad sameyn kartaa haddii aad dibadda joogto?

## Amaanka ayaa ugu muhiimsan

Si fiican uga foojignow amaankaaga oo la xariir safaaradda ama kuwa dadka caawiya ee Nederland marka aad hubto inaan qof kale ku maqleynin. Ha sameynin qatar aan loo baahnayn.

## Safaaradda Nederaanka

La xariir safaaradda Nederlaanka ee waddanka laugu qasbaayo inaad joogto. Websayt-ka www.nederlandwereldwijd.nl waxaad ku qori kartaa magaca waddanka si aad ula xariirto safaaraadda ama qunsuliyada.

Sidoo kale waxaad ReisApp aad ka heleysaa warbixinta qaabka la xariirka ee dhamaan safaaradaha Nederlaanka. Waxaadna ka soo dejin kartaa App Store-ka ee Apple ama Google Play Store-ka.

Markaad la xariirto safaaradda si waadix ugu sheeg dhibka jira iyo inaad qabto dhibaato guur qasab ah ama in dibada lagaaga tegay. Markaa ayaa caawinaada kugu habboon lagu siinayaa. Marka hore wac ama u dir e-mail-ka si aad ballan u sameysato. Markaa waad hubtaa in safaaradda ay furan tahay.



Haddii ay kuu suuro geli weysey inaad safaaradda la xariirto ama waxaad rabtaa inaad habeenkii ama wiigendiga la xariirto? Isticmaal 24/7 nambarka Wasaaradda Arrimaha Dibadda: +31 247 247 247. Ama 24/7 WhatsApp-ka nambarka +31 682 837 796. Digtoonow: nambarkan ma wici kartid ama sms-ka uma diri kartid. Ma laha safaarad waddanka aad joogto? Markaa la xariir nambarka 24/7.

## Caawiyayaasha Nederland

Waxaad si toos ula xariiri kartaa caawiyayaasha ka socda LKHA: +31 70 345 43 19 ama LKHA@veiligthuishaaglanden.nl.

## Maxey sameynayaan safaaradda?

Safaaradda waxey marka hore fiirinayaan inaad jinsiyada Nederlaanka heysato ama aad heysato sharci ansax ah ama aan dhacsanayn. Markaasi ayaa safaarada ay ogeysiin ah guur qasab ah ama ka soo tegid ah ka sameynayaan LHKA. Lama sameynaayo ilaa adiga waxa aad ku raacsan tahay. Sida ay wax u soconayaan xaalada ayey ku xiran tahay. Safaaradda waxey isku deyi karaan in meel muddo aad joogto iney kuu helaan iyo in laguu sameeyo dokumentiga safarka oo cusub si aad Nederland ugu soo noqon karto.

## Maxey sameynayaan LKHA marka ogeysiin loo gudbiyo?

Caawiye ka socda LKHA ayaa kula soo xariiraaya. Waana baarayaa arrinta jira waxa uu yahay. Haddii lagugu qasbaayo inaad guursato ama lagaa soo tagaayo waxaa kaa caawinaaya LKHA iyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda sidii aad Nederland ugu soo noqon lahayd.

Xaalad walba mida kale waa ka duwan tahay. Sidaa awgeed waxaa fiican in si fiican loo baaro qorshaha ugu fiican uguna amaan badan oo qaab noqosho midka uu yahay. Taxadar oo digtoonow waxa aad sameyneyso oo ha iska soo bixin. Taasi xaalada wey sii adkeyn kartaa. LKHA iyo safaaradda qibrad ayey u leeyihiin habka wax looga qabsado dadka dibada looga soo tago ama guurka qasabka ah. Adigana waxaa fiican inaad raacdo tilmaanta ama waxa ay kuu sheegaan.

## Markaad soo noqoto ka dib

Haddii aad qaabka caawinaada LKHA aad Nederland ku soo noqotay LKHA ayaa kuu raadinaayo meel aad sii joogto ilaa muddo. Markaa ka dib waxey LKHA daryeelka ku wareejinaayaan caawinayaasha degaankaaga cusub. Waxeyna sannad iyo bar la soconayaan xaalada ama in cabsidii jirtey ay toos u dhamaatay ama inaad heshay caawinaada aad u baahan tahay.

## LKHA: qabiiriiinta caawinaada iyo talooyinka

Xariirinta wadanka ee Guurka qasabka iyo ka soo tegida (LKHA) waa ururka dhexe ee Nederland si ay u caawiyaan sida looga hortago guurka qasabka iyo/ ama ka soo tegida dibada. Caawinayaasha waa qabiiriin leh qibrado dheeraad. Haddii aad adigoo aan ka raali ahayn aad dibadda joogto, markaa waxaa ku caawinaaya LKHA sidii loo qorsheyn lahaa soo noqoshadaada.

## Xaqa aad u leedahay deganaanshaha Nederland

Waxaa LKHA markaad Nederland ku soo noqoto ku caawini karaan haddii aad jinsiyada Nederlaanka heysato ama sharci deganaansho ansax ah. Sidoo kale haddii aad heysato sharci deganaansho aad lamaanahaaga ku qaadatay, waa isu sheegi kartaa safaarada ama LKHA. Ha cabsanin inaad sheegto in dibadda lagaaga soo tegay. Sharcigaaga deganaansho lays kama noqsanaayo. Markaad Nederland ku soo noqoto ayaa codsi deganaansho madax banaan dalban kartaa markaa xaalada ayey ku xiran tahay xaqna waad u yeelan kartaa sharciga.

## Caawinaad Nederland dhexdeeda

- Veilig Thuis: 0800 2000
- Marka qatar jirto (Nederland dhexdeeda): 112

## Caawinaada dibadda

- Arrimaha Dibadda 24/7 (wicitaan telefoonka): +31 247 247 247
- Arrimaha Dibadda 24/7 (whatsApp-ka kala xariiri karta): +316 8283 7796
- Xariirinta Wadanka ee Guurka qasabka iyo ka soo tegida: +31 70 345 43 19

